

**Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Si Qoto-Dheer Uga Hadlay
Xaalada Dhaqaale Ee Dalka Iyo Caalamkaba Ka Taagan Wakhtigan,
Waxyabaha Laga Qabtay & Waxa Uga Qorshaysan Dawladda-ba.**

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Soo Agaasintay Kulan-Hawleed
Sadex-Geesoood Ah Oo Lagaga Arinsanayey Fududaynta Bixinta
Lacagaha Maalgashiga Ah Ee Ay Bixiyaan Bangiyada-gaarka Ah Ee Dalku

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda Oo Furay
Kulan-Hawleed Wadatashi Ah Oo Loo Qabtay
Agaasimayaasha Maamulka Iyo Xisaabaadka 8 Degmo

Hiigsiga Istaraatiijiyadeed Ee Siyaasadda Cashuuraha
Qaranka Somaliland

Warbixinta Waxqabadkii Waaxda Cududda Shaqaalaha
Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ee 2021-Kii.

Danjire
Magazine

April - June 2022

Fariinta Hawlwadeenada Danjire

Danjire waa Xog-side sedex-biloodle ah, kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Wuxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.



Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda:

Info@slmof.org ama formka cabashada iyo talooinka ee

Website-ka W.H.Maaliyada www.Slmof.org.

Follow & Subscribe us



Tusmada

Wasiirka W.H.Maaliyadda JSL Oo Si Qoto-Dheer Uga Hadlay Xaalada Dhaqaale Ee Dalka Iyo Caalamkaba Ka Taagan Wakhtigan, Waxyaabaha Laga Qabtay & Waxa Uga Qorshaysan Dawladda-ba. 2

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda Oo Furay Kulan-Hawleed Wadatashi Ah Oo Loo Qabtay Agaasimayaasha Maamulka Iyo Xisaabaadka 8 Degmo 5

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar U Furay 30 Sarkaal Oo Ka Tirsan Cashuuraha Berriga ee Gobolka Maroodi Jeex 7

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Soo Agaasintay Kulan-Hawleed Sadex-Geesood Ah Oo Lagaga Arinsanayey Fududaynta Bixinta Lacagaha Maalgashiga Ah Ee Ay Bixiyaan Bangiyada-gaarka Ah Ee Dalku. 10

Koox Hanti-dhawrayaal ah oo uu Hoggaaminayo Hanti-dhawrahaha Guud ee Somaliland Oo Safar Aqoon-korodhsii ah ku tegay Dalka Uganda 14

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Si Rasmi Ah U Furtay Kastamka Ina-Guuxaa Ee Degmada Sallaxley. 15

Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire Ayaa Kormeer Shaqo Ku Tagay Magaalada Baligubadle Ee Xarunta Gobolka Hawd 17

Nuxurka Kulon Madaxda Wasaaradda H. Maaliyadda La Yeelatay Guiddida Dhaqaalah Golaha Wakiiladda JSL 19

Kala-saraynta iyo Mudnaanta Dabbaqaada iyo Hogaansanaanta Xeerarka Maaliyadda JSL 20

Hiigsiga Istaraatiijiyadeed Ee Siyaasadda Cashuuraha Qaranka Somaliland 22

Wax Ka Barro Waajibaadka Iyo Qaab-Dhismeedka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL 25

Khariirada Heerka Isdiwaangelinta Cashuuraha ee Ganacsatadda 28

Warbixinta Waxqabadkii Waaxda Cududda Shaqaalah Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ee 2021-Kii. 34

HORDHAC 35

WAXQABADKII WAAXDA EE SANADKA 2021 36

Xogsidaha Cashuurta iyo Cashuur-bixiyaha. 39

**Wasiirka W.H.Maaliyadda JSL Oo Si Qoto-Dheer Uga
Hadlay Xaalada Dhaqaale Ee Dalka Iyo Caalamkaba Ka
Taagan Wakhtigan, Waxyaabaha Laga Qabtay & Waxa
Uga Qorshaysan Dawladda-ba.**

**“Sicir-Bararku Kuma Koobna Dalkeena Ee Caalamka Ayaa Innala
Qaba, Xukuumaduna Talaabooyin Badan Ayey Qaaday Kuwaas Oo
Lagu Xakamaynayo Sicir-Bararka”**

Wasiirka Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire



Hargeisa, June 18, 2022 (W.H.M) – Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayaa warbixin uu si qoto-dheer ugaga hadlayso xaaladaha dhaqaale ee dalka, kuwa caalamka iyo waxyaabaha laga qabtay ilaa hada iyo waxa uga qorshaysan culaysyada dhaqaale ee wakhtigan jira ka jeediye Kal-fadhigii Golaha Wasiiradda ee 2 June 2022 ka qabsoomay xarunta qasriga madaxtooyadda oo uu Guddoominayey Madaxwaynaha JSL Md Muuse Biixi Cabdi isla markaana uu Goobjoog ahaa Madaxwayne Ku Xigeenka Somaliland Md Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil (Saylici).

Wasiirka Horumarinta Maaliyadda Dr Sacad Cali Shire ayaa tilmaamay in sicir-bararka dalka ka jira aanu gaar ku ahayn Somaliland, balse uu yahay mid caalamku innala qabo, isla markaana uu sababay isbedelada caalamka ka dhacay iyo dagaaladu, xukuumaduna waxay qaaday talaabooyin kala duwan oo hoos loogu dhigayo culaysyada jira.

Nuxurka Khudbad dhinacyo badan taabanaysa oo Wasiirka H. Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire Ka Jeediye Shirkii Golaha wasiiradda Somaliland oo u guddoominayey Madaxwaynaha JSL Md Muuse Biixi Cabdi, isla markaana uu goobjoog ahayd Madaxwayne Ku Xigeenka Somaliland Md Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil (Saylici) ayaa uu Wasiirka H. Maaliyadda Somaliland Dr Sacad Cali Shire ka jeediye Khudbad uu si qoto-dheer ugaga hadlayo xaaladaha dhaqaalah ee Somaliland iyo Caalamkaba ka taagan wakhtigan waxyaabaha laga qabtay iyo waxa uga qorshaysan dawladda.

Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Jamhuuriyadda Somaliland, Dr. Sacad Cali Shire, ayaa golaha uga warbixiyey xaaladda sicir-bararka ee dalka ka taagan, isaga oo sheegay in daraasadii u dambaysay ee Wasaarada Qorsheyntu samaysay bishii April, marka la isku wadda daro dhamaanascaarta uu ahayd 6.9%, cuntada marka

gaar loo eego waa 7.3%, tamarta waxay ahayd 10.5%, waxana uu caddeeyey in Bariiska 25kg oo ahayd 13\$ imika qiimihiisu marayo \$17, Sonkorta 25kg marayso \$17, Daqiqda 25kg oo 11\$ ahayd waxay maraysaa \$17, Saliidda cuntada 9 litir, oo 9\$ ahayd waxa ay maraysaa \$14, Baastada 10kg, oo 9\$ ahayd waxuu qiimaheedu marayaa \$11, halka shidaalka Halkiisa litir, uu maanta marayo 97,000 oo shilin Somaliland ah.

Wasiir Dr Sacad ayaa sheegay in aan sicir-bararku ahayn mid u gaar ah Somaliland, balse guud ahaan caalamku la qabo, isaga oo tusaale usoo qaatay Wadanka Maraykanka oo sicir-bararku marayo 8.9% kaasi oo gaadhay halkii ugu sarreysay 40 sannadood, dalka Ingiriiska waxuu gaadhay 9% waa markii uu ugu sarreeyey muddo 40 sannadood, dalka Kenya oo cuntada beerta, sicir-bararkana ka asturan waxa uu bishii April ahayd 6%.



Sidoo kale warbixin Baanka Aduunku ka soo saaray isbedelka ascaarta maciisha bilahii March & April, marka loo eego bilahii Jan & Febr waxuu ku sheegay in uu kordhay 15%. Sicirka cuntadu labadii sannadood ee u dambeeyey waxuu koordhay 98% dunnida.

Wasiirka Maaliyadda Dr Sacad oo sharaxaad ka bixinayey sababaha keena sicir-bararka ayaa sheegay inuu yahay qiimihi oo isbedelay ama kor u kacay, taasoo ka dhalata dalabka iyo sahayda (Demand/supply), waxyaabaha keena

waa qaar dibedda ka yimaada iyo wax gudaha dalka ka yimaada. Sicir-bararka dalkeena ka jira waxuu ka yimi dibedda, waxaanu ka bilaabmay caabuqii COVID19-ka, oo bandoo lagusoo rogay waxyaabihii lasoo saari jiray oo dhan, isla markaana markii uu COVID19-ku gabaabsi noqday ee warshadahii iyo ganacsigiiba dib loo furay, waxa sare u kacay baahida loo qabo shidaalka, sidaa darted shidaalkii ayaa qaaliyoobay.

Waxa kale oo saamayn ku leh dagaalka ka socda Ruushka & Ukrain, gaar ahaan sicir-bararka cuntada, maadama labbada wadan soo saaraan Qamadiga caalamka laga iibyo 28%.

Waxa kale oo culayska sii kordhiyey wadammo badan oo ay kamid yihin hendiya, Masar, Induunusiya iyo Malaysiya, oo hakiyey cuntadii ay caalamka ka iibin jireen, ganacsatadeenuna waxa ugu badan ee ay dibedda ka keenaan waa cuntada, oo ay kasoo iibsadaan dalalka Hindiya, Malaysiya & Masar.

Waxa kale oo sababay isbedelka cimilada caalamka, oo dhulalkii wax laga beeri jiray roob yaraan awgeed wax-soo-saarkii beerahu hoos-udhaceen.

Waxa kale oo uu Wasiirku sheegay in tiradda dadka dunida ku nool ay sii kordhaan, isla markaana baahida loo qabo cuntadduna kor ayey u kacaysaa wixii lasoo saarayeyna lama jaanqaadayaan baahidii loo qabay cuntada.

Mar uu ka hadlayey Wasiirku tallaabooyinka ay xukuumaddu qaadday ayuu mid mid u sharraxyay, waxana ay xukuumaddu qaadday tallaabooyinkan soo socda.

Wasiirku waxa uu sheegay inay cashuur dhaaf u sameeyeen dhammaanba qalabka iyo agabka beeraha ee dalka la keenayo sida cagafta, bacariminta iyo suntan, qalabka warshadaha cuntada gudaha soo saara cashuur-dhaaf ayaa xukuumadu u samaysay, sidoo kale waxay cashuur dhaaf u samaysay qamadiga dibedda ka yimaada.

Waxa kaloo xukuumadu cashuurta ka dhaaftay 10% bisha Jan ilaa June, afar shay oo waaweyn oo nolosha bulshada muhiim u ah oo kala ah Bariiska, Sonkorta, Daqiqda iyo Saliidda.

Waxa la dhiirrigeliyey wax soo saarka dalka, waxana miisaaniyadda qaranka sannadkan 2022 la geliyey lacag dhan Afar Bilyan oo Somaliland shilin ah, oo lagu maalgelinayo mashruuca Wajaale, Beer iyo Oodweyne, mashruuca Cilmi-baadhistaa iyo fidinta, mashruuca ilaalinta cudurrada dhirta iyo mashruuc aannu ugu talo galnay inaanu beeralayda wax kaga iibsanno xilliga dalaggu usoo go'o si aanu sicirku hoos uga dhicin.

Waxa la ilaaliyey qiimaha shilinka Somaliland oo meel sugar oo aanu hoos uga dhicin lagu fadhiisiyey muddo afar sanno ah.

Waxa kor loo qaaday xaddiga sulfer ka shidaalka dibadda inooga imanaya, oo 500 ahaa waxa laga dhigay 2000, maadaama shidaalka sulfer-ku sarreeyaa ka qimo jaban yahay ka kale.

Waxa xukuumaddu raashin taakulo ah u qaybisay 58,620 (Siddeed iyo konton kun lix boqol iyo labaatan) qoys, oo u dhiganta 351,720 qof.

Dhinacyadaasi waa talaabooyinkii xukuumadu u qaaday yareynta culayska sicir-bararka.

Wasiir Dr. Sacad oo ka sii hadlayey qorshayaasha xukuumadu ku sii xakamaynayso kor-u-kaca

sicir-bararka ayaa sheegay in la qorsheeyey sidii cashuur-dhaafka 10% ee cuntada hore loogu sameeyey la sii waddo ilaa dhamaadka sannadka. Waxa kaloo xukuumadu ku dedaalaysa ainay ku wacyigeliso ganacsatadeena inay maalgashadaan wax-soo-saarka beeraha, oo ah isha ganacsatada aduunku dhaqaalah ka helaan.

Waxa kaloo loo baahan yahay qorshe xukuumadu dhigato sannadka soo socda in qiyas dhul dhan 100 kun hectar wax laga beero dalka Barri ilaa Galbeed, si bulshadu ay kordhisoo wax-soo saarkeeda dhinaca cuntada beeraha in xukuumadda iyo ganacsatadu ay isla eegaan qiimaha badeecadda.

Waa in lagu soo xisaabtamo duruufaha ka dhalan kara, si dhowna aynu ula soconno, kana jawaabno, maadaama roobabkii gu'ga oo da'ay, balse aan si wanaagsan dalka u helin, baad xoolahu miisaankoodu ku soo noqdaana aanay di'in, uu xagaagii bilaabmay. Sidoo kale waa inaynu caalamka iyo dalalka saaxiibada nahay ku baruarujino culaysyada bulshadeena ka soo waajahay roob yaraan, sicir-barar iyo abaaraha, kana dalbanno sidii ay wax inoo gala qaban lahaayeen.

Waa in bulshadeena mar walba xukuumadu la wadaagto xaaladaha dalku marayo iyo sida loogu baahan yahay in meel looga soo wada jeedsado qaabkii looga bixi lahaa.

**Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda Oo Furay
Kulan-Hawleed Wadatashi Ah Oo Loo Qabtay Agaasimayaasha
Maamulka Iyo Xisaabaadka 8 Degmo**



Hargeisa, June 18, 2022 (W.H.M) – Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda Md. Maxamed Cabdi Gurxan ayaa furay kulanhawleed wadatashi ah oo loo qabtay Agaasimayaasha Maamulka iyo Xisaabaadka 8 degmo oo uu ka socdo mashruuca wadaaga ah ee adeeg daadejinta Dawladdaha-Hoose ee JPLG.

Kulanka oo lagaga tashanayey sidii loo horumarin lahaa habka maamulka xisaabaadka oo hadalo ka jeediyeen Agaasimaha Horumarinta gobolada & Degmooyinka ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha Md. Maxamed Axmed Cali ayaa ka waramay muhiimada kulankani u leeyahay hawlaha maamulka xisaabaadka ee agaasimayaasha Maamulka & Xisaabaadka ee Dawladaha hoose, waxaanu yidhi, muhiimada siddeedan Degmo loo soo xushay waa iyagoo si weyn loo kobciyey aqoontooda maamulka iyo xisaabaadka, maamulka dawlada marka ay noqoto lacag ururinta ama ku shaqeeynta iyo kharashgareynta,

sida xisaab-celin iyo hanti-dhowr gudaha ah oo loo sameeyey dhamaantoodna la casriyeyey. Waxa la idiinka doonaya inaad soo saartaan warbixino faahfaahsan oo ka turjumaya hanaanka xisaabaadka, iyo isbedelada lagu sameeyey shuruucda maaliyadda dalka inaad xogogaal u noqotaan.

Agaasime Maxamed ayaa raaciyeey in loo baahan yahay sidii barnaamijka cusub ee maamulka xisaabaadka dawlada loogu dhaqmi lahaa, maadama uu yahay siysaada dawladda ee dib-u-habaynta maamulka xisaabaadka.

Loona baahan yahay in degmooyinka oo dhami ku shaqeeyaan, weliba siddeeda Degmo ee barnaamijka GPLG ka hirgalay laga fuliyo. Hanaankan cusub wuu ka hawlyar yahay sidii hore waa hal nidaam qoritaan (single entry system).

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda Md. Maxamed Cabdi Gurxan oo si rasmi ah kulanka u furay ayaa sheegay, inuu kulanku yahay wada tashi iyo sidii loo fulin lahaa hawlaha horumarinta xisaabaadka, isagoo yidhi:

“Ujeedada kulanku waxay daba socotaa, sida aynu ognahay sannadka 2021, degmooyinka waaweyn ee LDF-ka ku jira, iyo siddeedan degmo iyo dhamaan degmooyinka dalka waxa dib-u-habayn lagu sameeyey nidaamka ay u samaysanayaan miisaaniyaddaha, xaga dakhliga iyo dhinaca kharashka.

Md. Gurxan ayaa ku amaanay degmooyinki tababarka loo qabtay hanaankii ay miisaaniyaddaha u soo gudbiyeen sannadkii 2021 iyo 2022, waxaanu yidhi:

“Qaabkii aad miisaaniyaddaha u soo gudbiseen sannadkii 2021 iyo 2022 waxuu si weyn uuga faahfaahsanaa, qaababkii aad hore ugu soo

gudbin jirteen. Dhinaca dakhliga waxa labadii sannadood ee u dambeeyey Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Maaliyadda & Dawladdaha hoose oo iskaashana ay ku guulaysteen in summad xisaabeedka lagu qabanayo dakhliyadda la waafajiyo summad xisaabeedka caalamiga ah ee dawladda dhexe oo guud ahaan wadamadda aduunku dakhliga iyo kharashka ku maamulaan ee loo yaqaan (Standard Chartered Accounts).

**Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar
U Furay 30 Sarkaal Oo Ka Tirsan Cashuuraha Berriga ee Gobolka
Maroodi Jeex**



Hargeisa, June 21, 2022 (W.H.M) - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland Md. Maxamed Cabdi Gurxan ayaa 18 June, 2022 magaaladda Hargeisa tabobar uga furay 30 sarkaal oo ka tirsan Waaxda Cashuuraha-Berriga ee gobolka Maroodi Jeex, kaas lagu tababaray daryeelka cashuur-bixiyaha iyo xidhiidhka dadwaynaha.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda Md. Maxamed Cabdi Gurxan oo madashaasi ka hadlay ayaa si qoto dheer uga warbixiyey ahmiyada uu tobabarkaas oo mudo todbaad ah socday u leeyahay saraakiishaasi, sidoo kale waxa uu ka warbixiyey guud ahaan shaqada ay qabato Wasaaradda Horumarinta Maaliyadu iyo gaar ahaan Waaxda Cashuuraha-Berriga waxana hadaladiisi kamid ahaa.



Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waa adeeg bixiye bulshada inteeda badan xidhiidh toosa iyo mid dadbanba la leh, isla markaana ka masuula ururinta dakhliga dawlada, qorshayntiisa, bixintiisa iyo xisaab celintiisba. Sanad walba waxay Wasaaraddu dhigataa yool bartilmaameed dakhli oo ku salaysan miisaaniyada Dawlada.

Waaxda Cashuuraha Berrigu waa waaxda labbaad ee dakhli soo saarka, waa waaxda ugu badan dhinaca la xidhiidhka cashuur bixiyaha iyo dadwaynaha, yoolkeeda shaqo waxa kamid ah in ay dakhliga loo asteeyey soo saarto iyo in ay gaadho halbeegyada daryeelka macaamilka ee waaxda u dajisan.

Si ay waaxdu yoolkeeda u gaadhana waxa lagama maarmaan ah oo ay soo agaasintay waaxdu in aynu samayno habraac aynu ka wada

midaysanahay maamulka waaxda ilaa cashuur ururiyayaasha, nidaamkaas oo tilmaamaya sida ugu fiican ee loogu adeego cashuur bixiyayaasha iyo bulshada inteeda kale.

Sidoo kale waxa isna dhankiisa ka hadlay ahmiyada uu tobabarkani leeyahay Agaasimaha Waaxda Cashuuraha-Berriga Md. Maxamed Ibraahin Batuun, oo sheegay in ay Waaxda Cahuuraha-Berrigu tahay adeegbixiyeyaa, marka ay adeegbixin tahayna waxa loo baahan yahay habka ugu wanaagsan in aynu ula dhaqano macmiilka adeega loo qabanayo.

Sidoo kale waxa uu sheegay Agaasime Batuun in aanu tobabarkani ahayn kii ugu horeeyey, ee uu dabo socdo tobabaro hore oo Saraakiisha Waaxda la siiyey.



Tabobarkan oo socon doona mudo todobaad ah waxa lagu bari doonaa hawl-wadeenada ka qaybgalaya casharo la xidhiidha Daryeelka Cashuur-Bixiyaha iyo Xidhiidhka-Dadweynaha, iyada oo maalinba dagmo loo qaban doono hadii Rabi ogolaado.

Waxaana wajiyada xiga ee is la tabobarada noocan ah laga qaban doonaa gobolada iyo degmooyinka dalka, iyada oo looga golleeyahay sidii loo heli lahaa hawl-wadeen dakhli oo

u laylyan Daryeelka Macmiilka/Cashuur-Bixiyaha, iyo wanaajinta macaamilka bulshada guud ahaan.

Ugu danbayna, kor u qaadista aqoonta iyo wacyiga saraakiisha dakhli-soo-saarka ayaa ka mid ah meelaha mudnaanta sare noo leh ka Wasaarad Maaliyad ahaan sanadkan 2022.

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Soo Agaasintay Kulan-Hawleed Sadex-Geesoood Ah Oo Lagaga Arinsanayey Fududaynta Bixinta Lacagaha Maalgashiga Ah Ee Ay Bixiyaan Bangiyada-gaarka Ah Ee Dalku.



Hargeisa 20 June,2022 (WHM)- Kulan-hawleed ay soo agaasintay Wasaarada H. Maaliyaddu gaar ahaana Waaxdeeda Ganacsiyada Gaarka ah, ayaa 20/06/2022-kii ka qabsoomay hallka shirarka Bangiga-dhexe ee JSL, kulan-hawleedkaas oo ujeedadiisu daaranayd sidii loo fududeyn lahaa

hellitaanka lacagaha maal-gelinta gudaha iyo guud ahaan sidii loo fududeyn lahaa adeegyada maaliyadeed ee Dalka, iyada oo ay Wasaaradda Maaliyaddu halkaa ku soo bandhigtay daraasad ay ka samaysay helidda maal gelinta ee ganacsatadda iyo caqabadaha ay kala kulman.



Kulanka oo ay ka soo qayb-galeen masuuliyiin ka kala socotay qaybaha kala duwan ee uu khuseeyo mawduuca kulanka lagu gorfaynayey, waxa ka mid ahaa Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda Dr.Sacad Cali Shire, Wasiirka Wasaarada Maalgashiga Md. Cabdilahi Aare, Wasiir-ku-Xigeenka Wasaarada Ganacsiga Md. Muuse Ibraahim Salaf, Gudoomiye-Ku-Xigeenka

Bangiga-dhexe Md. Cabdiraxmaan Sh. Xasan, Ururka ay ku midoobeen bangiyada-gaarka loo leeyahay, masuuliyiinta bangiyada gaarka ah ee dalka sida: Dahabshiil Bank, Daarasalaam Bank, premier Bank, Amal Bank iyo xubno kale oo ka socday hay'addo iyo xubno kale oo ka socday hay'addaha ama sharaaiga kale ee ka shaqeeya adeegyada maaliyadeed.



Hargeisa 20 June,2022 (WHM)- Kulan-hawleed ay soo agaasintay Wasaarada H. Maaliyaddu gaar ahaana Waaxdeeda Ganacsiyada Gaarka ah, ayaa 20/06/2022-kii ka qabsoomay hallka shirarka Bangiga-dhexe ee JSL, kulan-hawleedkaas oo ujeedadiisu daaranayd sidii loo fududeyn lahaa hellitaanka lacagaha maal-gelinta gudaha iyo guud ahaan sidii loo fududeyn lahaa adeegyada maaliyadeed ee Dalka, iyada oo ay Wasaarada Maaliyaddu halkaa ku soo bandhigtay daraasad ay ka samaysay helidda maal gelinta ee ganacsatadda iyo caqabadaha ay kala kulman.

Kulanka oo ay ka soo qayb-galeen masuuliyiin ka kala socotay qaybaha kala duwan ee uu khuseeyo mawduuca kulanka lagu gorfaynayey, waxa ka

mid ahaa Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda Dr.Sacad Cali Shire, Wasiirka Wasaarada Maalgashiga Md. Cabdilahi Aare, Wasiir-ku-Xigeenka Wasaarada Ganacsiga Md. Muuse Ibraahim Salaf, Gudoomiye-Ku-Xigeenka Bangiga-dhexe Md. Cabdiraxmaan Sh. Xasan, Ururka ay ku midoobeen bangiyada-gaarka loo leeyahay, masuuliyiinta bangiyada gaarka ah ee dalka sida: Dahabshiil Bank, Daarasalaam Bank, premier Bank, Amal Bank iyo xubno kale oo ka socday hay'addo iyo xubno kale oo ka socday hay'addaha ama sharaaiga kale ee ka shaqeeya adeegyada maaliyadeed.



Waxaana intii kulanku socday si qoto-dheer loogu lafo-guray sidii loo xoojin lahaa wada shaqaynta Hay'addaha Dawladda, Ganacsatada iyo bangiyada-gaarka ah, iyada oo la is dul-taagay arimo ay ka mid yihiin qodobadan hoose:

- i. Sidii kor loogu qaadi lahaa wacyiga bulshada ee isticmaalka bangiyada
- ii. Iskaashiga ka dhexeeyaa bangiyada gaarka loo leeyahay dhexdooda
- iii. Fududaynta maalgashiga bangiyadu u sameeyaan ganacsatada iyo bulshada
- iv. Wada shaqaynta dawlada iyo bangiyada gaarka loo leeyahay iyo sidii dawladu ugu abuurilahayd bangiyada nidaamka ugu

fudud ee wada shaqayneed.

Waxaana gabogabadii Kulan-hawleedka la is kula qaataay, in la abuuro guddi-farsamo oo halkaas kasii ambaqaada hawsha, iyada oo loo balamay in bishiiba mar la qabto kulan noocan oo kala ah, si la isula eego hadba waxa ka qabsoomay arimihiil la is la qaataay, iyo guud ahaan waxa hadba ku soo kordha xaalada wada shaqayneed ee sadexda dhinac.

Koox Hanti-dhawrayaal ah oo uu Hoggaaminayo Hanti-dhawrahaha Guud ee Somaliland Oo Safar Aqoon-korodhsii ah ku tegay Dalka Uganda



Hargeisa 20 June,2022 (WHM) - Xafiiska Xidhiihinta Mashruuca Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda ee Wasaaradda Horumarinta Maalyadda JSL ayaa soo agaasimay isla-markaana fududeeyey safar aqoon-korodhsii ah oo ay Koox Hanti-dhawrayaal ah oo uu Hoggaaminayo Hanti-dhawrahaha Guud ee Dawladdu ku tageen Dalka Uganda, intii u dhaxaysay May 22- 29, 2022

Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka oo kamid ah hay'adaha dawladda ee uu taageero mashruuca uu maalgeliyo Baanka Adduunku ee Dib-u-habaynta Maamulka Maaliyadda Dawladda (PFM), waxa in muddo ah ka socday dib-u-habayn ballaadhan oo dhinacyo badan leh, iyada oo kor u qaadis iyo horumarin lagu sameeyey dhamaan dhinacyadda; cududa shaqaalaha, qaab-dhismeedka iyo qalabka fududeeya hawlaho kala duwan ee xafiisku ku shaqeeyo, iyo iyada oo sidoo kale ay Miisaaniyadda dawladda Somaliland u qooddayso

xafiiskan kordhisay.

Haddaba, si Xafiiska Xanti-dhawraha Guud ee Qaranku uga helo aqoon iyo waayo aragnimo dheeraad ah hay'addaha kale ee dhiggiis ah ee ku yaalla gobolka, waxa ay koox Hanti-dhawrayaal ah oo uu hoggaaminayey Hanti-dhawraha Guud ee Somaliland Mudane Axmed Yuusuf Dirir ay muddo 7 maal mood ah kulamo qorshaysan la qaateen Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Uganda. Intii ay kulamadani socdeen, waxa ay hanti-dhawrayaasha ka socday Somaliland dhugteen aqoon iyo waayo-aragnimo badan oo ku saabsan hannaanka hanti-dhawrka, kuwaasi oo ay kamid ahaayeen; -

1. Nidaamka loo qiimeeyo, loona dabogalo hanti-dhawrayaasha hanti-dhawrista sameeyey (Quality Assurance Auditing)
2. Habka loo baadho nidaamyadda iswada iyo xatooyooyinka dhaca (IT audits and Fraud investigations)

3. Nidaamka loogu gudbiyo Golaha Wakiilada war-bixinaha kala duwan ee hanti-dhawriseed (Audit reports and the procedures to the Parliament)

4. Habka iyo hanaanka loo sameeyo baadhisaha gaarka ah, si loo hubiyo qiimogalka lacageed (value for money and specialized audits procedures)

Intii lagu gudojiray safarka aqoon-korodhsiga ah, Dawladda Uganda, gaar ahaan Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Dawladda Uganda waxa ay dawlada Somaliland u muujiyeen Saaxiibtinimo iyo wadashaqayn heer sare ah.

Hanti-dhawraha Guud ee Somaliland Mudane Axmed Yuusuf Dirir waxa uu u mahad naqayaa Dawladda Uganda gaar ahaan xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka (Audit House) iyo Baanka Adduunka gaar ahaan Mashruuca Dib-u-habaynta Maamulka Maalyadda Dawladd (PFM) oo fududeeyay hawshan safarka aqoon-korodhsiga.

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Si Rasmi Ah U Furtay Kastamka Ina-Guuxaa Ee Degmada Sallaxley.



Salaxley 15 June, 2022 (WHM) - Munaasabadda furitaanka kastamka Ina-Guuxaa oo halkaasi ka qabsoontay 15 June 2022-ka ayaa waxa kasoo qayb galay xubno katirsan Golaha Wasiirada Xukuumadda, xubno ka tirsan Golayaasha Wakiilada iyo Guurtida iyo sidoo kale xildhibaano ka tirsan Golaha Deegaanka Degmooyinka Sallaxley iyo Hargeysa, Madax dhaqameed, Odayaasha iyo wax-garadka deegaanka.

Maamulka degmada Sallaxley iyo qaybaha bulshada deegaanka Ina-Guuxaa ayaa soo

dhaweeeyay furtitaanka kastamka iyagoo xukuumadda uga mahadceliyay furitaanka kastamka Ina-guuxaa, oo dhaca xuduudka koonfureed ee Gobolka Maroodi-Jeex.

Sidoo kale Wasiirka waxbarashada, Wasiir ku xigeenka ganacsiga, Guddoomiyaha gudida maamul wanaagga, xildhibaano ka kala tirsan Guurtida, Wakiilada iyo deegaanka Hargeysa ayaa bogaadiyay kastamka wasaaradda horumarinta Maaliyadda ka furatay deegaanka xuduudda ah ee Ina-Guuxaa.



Waxaana gabogabadii munaasibadda si rasmi ah xadhiga uga jaray Wasiirka Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire, isagoo sheegay inay wax kastaaba u dhamaystiran yihiiin diyaarna uu kastamku u yahay inuu shaqeeyo.

Ugu danbayn, Kastamkan cusub ee laga furay deegaanka Ina-Guuxaa oo hoos taga Degmada Salaxlay ee Gobolka Maroodi-Jeex, waxa la rajaynayaa inuu wax weyn ku soo kordhin doono dakhliga Dawladda-Dhexe iyo kan Degmada Sallaxleyba, is la jeerkaasna uu gacan-

weyn ka gaysan doono hawlaha la dagaalanka maandooriyaha iyo ganacsiga sharci-darada ah, maadaama uu ku yaalo goob muhiima.

Kastamkan cusub oo ku soo beegmay xili baahi weyn loo qabay, ayaa ka hawlgali doona deegaanka baaxadda leh ee ku teedsan xuduuda Somaliland iyo Ethiopia, gaar ahaana jihada koonfureed ee Gobolka Maroodi-Jeex, waana aaga u dhixeyya Kastamada Baligubadle ee G. Hawd iyo Kastamka Dabo-Gorayaale oo ka tirsan G. Daadmadheedh.

Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire Ayaa Kormeer Shaqo Ku Tagay Magaalada Baligubadle Ee Xarunta Gobolka Hawd



Baligubadle, June 18, 2022 (W.H.M) – Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire ayaa 15 June 2022 kormeer shaqo ku tagay magaalada Baligubadle ee xarunta Gobolka Hawd.

Safarka wasiirka ee Baligubadle oo qayb ka ahaa kormeer shaqo oo uu maalmahanba uugu kuurgalayey habsami u socodka shaqo ee goobaha dakhli qabashada Dalka, iyo sidoo kale

xog-ogaal u noqoshada dadka iyo deegaanada ka baxsan caasimada.

Waxa intii uu ku gudojiray safarkiisii shalay uu soo furay Kastamka Ina-Guuxaa ee Degmada Sallaxley, isaga oo xadhiga ka soo jaray dhismaha cusub ee uu ku hawlgali doono Kastamka Faraweyne.



Intii uu ku sugnaa magaalada Baligubadle, Wasiirku waxa uu xarunta Wasaaradda Maaliyadda kulan kula qaataay masuuliyiinta iyo hawl-wadeenada Kastamka, Cashuuraha-Berriga iyo waliba Ciidanka ilaalada cashuuraha ee Degmada, isaga oo war-bixino dhinacyo badana ka dhagaystay.

Intaa kadibna Wasiirka Maaliyadda Somaliland Dr. Sacad Cali Shire waxa uu kulan mudo dheer qaataay la yeeshay maamulka heer gobol iyo kan degmada Baligubadle oo is kugu jiray maamulka

qaybihiisa, kulanka oo ka qabsoomay Xafiiska Gudoomiyaha waxa sidoo kale qayb ka ahay mudanaha Golaha Wakiilada Somaliland ku matala deegaanka, xildhibaanada Degmada, qaar ka mid ah odayaasha iyo waxgarad kale.

Iyada oo intii uu kulanku socday lagaga wada hadlay arimo farabadan oo uu Gobolku u baahanyahay in wax laga qabto, maadaama ay muuqato horumar dhinacyo badan ah oo dadka deegaanka iyo gobolku si is xilqaan ah u fuliyeen.

Kulankaasi markii uu soo dhamaaday waxa uu Wasiirku booqday meelo kala duwan oo ka tirsan magaaladan taariikhiga ah, isaga oo la sheekaystay is la jeerkaasna la shaheeyey dadweynaha reer Baligubadle oo runtii si milgo iyo maamuus sare leh u soo dhaweeeyey wasiirka wasaaradda Maaliyadda iyo masuuliyiintii kale ee la socdayba.



Nuxurka Kulan Madaxda Wasaaradda H. Maaliyadda La Yeelatay Guddida Dhaqaalaha Golaha Wakiiladda JSL



Hargeisa, June 18, 2022 (W.H.M) – Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda Md. Maxamed Cabdi Gurxan ayaa 2 June 2022 kulan la qaataay Guddida Dhaqaalaha Golaha Wakiiladda JSL, kulankaas oo ka qabsoomay xarunta Wasaaradda Maaliyadda.

Gebagebadii kulankaas ayaa labbada dhinac si wadajir ah warbaahinta ula hadleen, waxa uu Gudoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha Xildhibaan Barkhad sheegay in Guddiga Dhaqaalaha kulan shaqo kala yeeshen madaxda Wasaaradda Maaliyadda xeerar Maaliyadeed oo horyaala Kalfadhiga saddexaad ee golaha Wakiilada, isla markaana kala xajoonaynay meelo wax-ka-bedel u baahan xeerkarka, maadama xeer kasoo la sameeyo marka la dhaqangeliyo ee lagu shaqeeyo caqabado ka soo noqdaan u baahan in dib loo saxo, iyadoo laga eegayo wixii fududeynta bulshada iyo shaqada dan u ah.

Gudoomiye Barkhad ayaa hadalkiisa raaciye in kulamada madaxda Maaliyadda iyo guddiga dhaqaalaha oo wada shaqeyn dhow wadaagaana ay sii socon doonaa.

Agaasimaha guud ee Wasaaradda Maaliyadda Md. Maxamed Cabdi Gurxan oo dhinaciisa ka hadlay arrimaha ay ka wada hadleen guddiga dhaqaalaha golaha wakiiladda ayaa sheegay inay faahfaahin dheeraad ah ka siinayeen xeerka Dakhliga Somaliland, oo guddiga dhaqaalahu gacanta ku

hayaan.

Md. Gurxan ayaa sheegay inuu ahaa kulan muhiim ah oo xukuumadu faahfaahin dheeraad ah ka bixinaysay soo jeedimaha wax-ka-bedelka Xeerka Dakhliga oo golaha Wakiiladda horyaala, Guddiga dhaqaalahu-na gacanta ku hayso, waxa aanu isla fahamnay ujeedada xukuumadu ka leedahay soo jeedimaha wax ka bedelka xeerka, oo ujeedada ka dambaysa tahay sidii kor loogu qaadi lahaa dakhliga gudaha Dalka, si miisaaniyadaha iyo dhaqaalaha xukuumadu adeegyada bulshada ku fuliso u noqdaan kuwo suggan oo la isku halleyn karo, oo aanay saamayn ku yeelan dhaqdhaqaaqyada ganacsiga iyo isbedeladda dhaqaalaha aduunku.

Agaasimaha Guud ee Maaliyadda Md. Gurxan ayaa sheegay in muhiimada wax-ka-bedelka Xeerka Dakhliga u leeyahay dakhliga gudaha, xidhiihada ganacsiga caalamka iyo ganacsiga badeecadaha isaga gudba dalalka jaararka, oo ku samayn karno dekedaha, madaarada dalka, si aynu uuga faa'iideysanno wadamadda Afrikaanka ee aan baddaha lahayn, dhaqangalka xeerka Dakhligu waxuu fursad siin doonaa maalgashiga caalamiga, isu-socodka ganacsiga iyo isu-gudubka badeecadaha, oo fursad u heli doono inaynu ka faa'iideysano maadama maalgashigii Dekedda Berbera, jidki Berbera Corridor gebagebo ku dhow yahay iyo Aaga cashuuraha ka caagan (Free Zone) xeerkeedii Golaha Wakiiladu ansixiyeen.

Kala-saraynta iyo Mudnaanta Dabbaqaada iyo Hogaansanaanta Xeerarka Maaliyadda JSL



Hababka Kala Saraynta Xeerarka:-

Xeerarka Guud ahaan waxay leeyihiin nidaam kala sarayneed (Hierarchy Law) Waa sidan hoos ku cad :-

- Dastuurka: - Waxa Xeerka Ugu sareeya Xeerarka Dalka marka laga yimaado Islaamka, Mabaa'dida uu Daftuur-ku Xanbaarsan yahay wixa ka kow ah Maba'diida Shareecadda Islaamka, kaas oo ah mid lama taabtaan ah oo waxba laga bedeli karin sida ku xusan Qod 127aad ee Dastuurka Qaranka; haddii Dasturka ku wax lid ku ah Shareecadda waxa noqaysaa sharci daro.

Xeer Madax-Wayne / Xeer nidaamiye:-

- Xeer Madaxwayne: xaalado Gaar ah oo Dastuurka ku xusan sida Xaalado deg-deg ah oo kale ama aasaasidda Hayad cusub, dhaqan-gelin Xeer, Xeer Wasiir, IWM.
- Xeer Nidaamiyaasha lagu dhaqan-geliyo Xeerarka Dhaqan-galka: - badanna Xeer kasta gaarkiisa ayaa waxa ku jira Qodobo Wasiirkha awood u siinaya inuu soo saari karo Xeer nidaamiye ku dhaqan gelinayo Xeerkaasi. wasiirku waxa uu soo saari karaa Wareegto wasiirku waxa uu soo saari karaa Wareegto

• Xeer:- Waa Xeerarka ka soo baxa Golaha barlamaanka (Wakiilada, & Guurtida) ka dibna Madax-waynuhu uu Saxeexo, marka laga reebo Xeerarka Maaliyadda, kuwaas oo iyaga dhaqan-galkoodu noqonayo ka dib marka Golaha Wakiiladdu ansixiyaan Madaxwaynuhuna saxeexo, haddii Xeerarkaasi laga helo wax lid ku ah Dastuurka waxay noqonaysaa sharci daro

Wasiir lagu toosinayo Nidaamka xidhiidhka wada shaqayneed ee Hayadaha dawlada si waafaqsan Xeer dhaqan-galka ah

Wareegto maamul: waxa ay ka soo bixi kartaa Agaasime Guud, Agaasimaha Waaxeed, Madax qaybeed, Maamule & i.w.m; mid waliba waxa uu gaarkiisa usoo saari karaa qoraal ku saabsan wajibaadkooda shaqo ee heekiisa maamul waafaqsan.

Kala Mudnaanta Marka La Dabbaqayo Xeerarka dhaqangalka aha :-

- Haddii ay iska hor yimadaan Xeerka Guud & Xeer gaarka ahi waxa la qaadanayaa Xeerka Gaarka ah.
- Haddii ay iska hor yimaadaan Labo Xeer oo

gaar ahi mabd'a ahaan waxa mudnaanta la siiyaa ka ay gaar-u-sii tahay mawduuca arinkaas ku saabsan yahay.

Qodobada Dastuurka JSI ee ka ka Hadlaya Mabaadida Cashuuraha & Maaliyadda Dastuusrka JSI:-

Sida ku xusan Qod 14aad ee Dastuusrka JSI Waajibinta cashuuraha iyo takaaliiftooda waxa loo eegayaa danta umadda & maslaxada bulshadda.

- I. Curinta, dhaafida iyo wax ka bedelka cashuur ama takaaliif iyo wixii kale ee takaaliif ahba

xeer ayaa jidaynaya.

- II. Ribada iyo macaamilkasta oo ganacsi oo dhib ku keenaya bulshadda iyo ku xoolaysi sifo aan sharci ahayni way reeban yihiiin.

Qodobka 34-aad ee Dastuurka; waajibaadka muwadiniinta:-

Qof kasta waxa ku waajiba inuu si Hagar la'aan ah u bixiyo cashuurta iyo takaaliifta xeerku waajibiyey; iyad oo gudasho la'aanta ciqaabaha ka dhalanaya xeerku uu caddaynayo.

Awooddha jidaynta xeerarka Maaliyadda waxa Dastuurka Qaranku u gaar yeelay Golaha wakiilada JSI oo keliya.

Qodka 55 ee Dastuurka Qaranka JSI Miisaaniyadda:-

Golaha Wakiiladdu waxa uu ka doodi karaa, waxna ka beddeli karaa miisaaniyadda, waxaanu ku ansixinayaa go'aan Gole, Haddii ansixinta miisaaniyadda cusubi dhammaan weydo ka hor bilawga sannad Maaliyadeedka cusub, waxa lagu

dhaqmayaa miisaaniyaddii hore. Waxa waajib ah u soo bandhigidda xisaab-xidhka Golaha Wakiilada Sannad Maaliyadeed-kii dhammaaday muddo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabanta taariikhda dhammaadka sannad-maaliyadeedka.

Xeerarka Maaliyadda:-

Wasaaradda H. Maaliyaddu waxa ay mas'uul ka tahay dabbaqaada Xeerarka Maaliyadda si ay shaqadeedu u noqoto mid leh isla xisaabtan & Caddaalad dhinac walba. Xeerarka laf-dhabarta u ah Wasaradda Horumarinta Maaliyada waa;

1. Xeerka Dakhliga Xeer Lr 72/2016 & Xeernidaamiyayaashiisa
2. Xeerka Kastamka Xeer Lr; 73/2016 & xeernidaamiyashiisa
3. Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka. Xeer Lr; 75/201& Xeernidaamiyashiisa
4. Xeerka Qandaraasyada Qaranka lr: 82/2018
5. Xeerka Hant-dhawrka Qaranka Lr; 76/2016




Hiigsiga Istaraatiijiyadeed Ee Siyaasadda Cashuuraha Qaranka Somaliland

Xaaladda Dakhli-Ururinta Dawladda. (Revenue Performance)

Xaaladda dakhli ururinta dalka Jamhuuriyadda Soomaalilaan waa mid soo kobcaysa oo soo kordhaysa sanadba sanadka ka danbeeya.


Sida uu tilmaamayo jaantuska 1aad ee hoose, inta badan sidii loo qorsheeyay ayaa uu u soo xarooda dakhliga ama uu ku dhawaadaa marka la isbarbardhigo odoroska iyo dakhliga dhabta ah ee soo xarooday.

Jaantuska 1aad: Xaaladda Dakhli-Ururinta Dalka 2017-2020



Sida uu tilmaamayo jaantuska 2aad ee hoose, dakhliga Soomaaliland waxa uu ka yimaadaa meelo kale duwan, haseyeeshee, waxa ugu weyn dakhliga ka soo xerooda kastamada oo celcelis ahaan sanadkii noqda 70-80% iyo dakhliga berriga oo celcelis ahaan sanadkii noqda 20-30%.


Jaantuska 2aad: Xaaladda Dakhli Ururinta Ee Kastamada iyo Berriga 2017-2020



Waxyaalaha keenaya korodhka dakhli ee soo kordhaya sanadahan danbe, waxaa ugu waa weyn dhaqaalaha dalka oo soo kordhaya sanadba sanadka ka danbeeyaa, dib-u-habayn maaliyadeed oo wasaaraddu u samayso si joogto ah, casriyaynta odorasidda dakhliga, sal-balaadhinta cashuuraha (Tax-base broadening) daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka oo la xoojiyay, aaminaadda cashuur-bixiyaha ee dawladda oo soo kordhaysa iwm.

In kasta oo dakhli-ururinta dawladdu soo kordhayso ilaa sanadkii 2018, si degdega ah oo ka dhakhsso badan wadamada jaarka ah, haddana weli ma uu gaadhin saamiga/meesha ugu hoosaysa ee lagu soo jeediyay Qorshaha Horumarinta Qaranka Ee 2aad oo ah in uu gaadho dakhliga dawladda 15% marka loo eego wax-soosaarka guud ee dhaqaalaha dalka (Revenue-to-GDP ratio), si dawladdu u qaban karto adeegyada aasaasiga ah ee bulshada.

Jaantuska 3aad: Saamiga Dakhliga Somaliland Ee Dhaqaalaha Guud Ee Dalka, 2014-2021 (Somaliland's Revenue-To-GDP Ratio, 2014-2021)



2. Ujeedooyinka siyaasadda cashuurha (Objectives of the Tax Policy)

Ujeedooyinka siyaasadda cashuuruhu ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa weeye:

1. Helidda dakhliga ku filan oo ay dawladdu ku qaban karto adeegyada bulshada;
2. Xaqijinta u-sinaanta culayska cashuurta ee muwaadiniinta;
3. Dhiiri-galinta wax-soo-saarka dalka si loo yareeyo wax-kala-soo-degidda debedda;
4. Cashuurid ku badinta la soo degidda waxyaalaha dadka dhiba si loo yareeyo;
5. Ilaalinta deegaanka;
6. Yaraynta kharashka maamulka cashuuraha;
7. Xoojinta u-hogaansamidda iyo dabiqidda xeerarka cashuuraha ee cashuur-bixiyaha;
8. Ku tartamidda xagga cashuuraha ee gobolka;
9. Soo jiidatashada maalgashiga debedda;
10. Dhiirigalinta shaqada iyo dhaqaale kaydsashada.

3. Yoolka Istaraatiijiyadeed Ee Cashuuraha (Strategic Targets of Taxes)

Yoolka aas-aasiga ah ee higsiga cashuureed ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa weeye, in la horumarinyo ururinta dakhliga dalka lana kordhiyo saamiga cashuuraha ee dhaqaalaha guud ee dalka (Tax-to-GDP ratio) oo ay immika cashuuruhu ka yihiin saamigaa qiyaastii illaa 9-10% lana gaadhsiiyo 15% oo ah saamiga ugu hoose ee lagu calaamadiyay ama lagu dejiyay Qorshaha Horumarinta Qaranka Ee 2aad (NDPI), lana gaadho yoolcaa sanadka 2025. Taas macnaheedu waxa weeye in saamigaas 1% la kordhiyo sanadkiiba.

Yoolalka muhiimka ah ee ay higsanayso Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa kale oo ka mid ah:

1. In la yareeyo ku tiirsanaanta dakhliga kaftamada oo qaybta immika ay ka yihiin saamiga dakhliga guud ee dalka ee ah 80% lagu soo celiyo 50% sanadka 2030 Inshaa Allah.
2. In la kordhiyo saamiga dakhliga berriga oo immika ah 20% lana gaadhsiiyo 50% sanadka 2030 Inshaa Allah.

Si hadaba Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu u gaadho yoolalkaa higsi ee dakhligyeed waxa ay dejisay nidaam dib-u-habayneed oo ah maamulka maaliyadda xagga dakhli-ururinta iyo xagga kharash-bixintaba.

Si ay u kordhiso guud ahaan dakhliga guud ee dalka iyo gaar ahaan dakhliga berrigaba, Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa ay ku dedaalaysaa:

1. Diwaangalinta cashuur-bixiyaha;
2. Wacyi-galinta cashuur-bixiyaha;
3. Fududaynta nidaamka cashuur-bixinta iyo wanaajinta macaamilka cashuur-bixiyaha;
4. Hirgalinta nidaam cashuur-bixineed oo loo adeegsado habka is-wada (automate), iyada oo laga faaiidaysanayo technology-ga casriga ah, si loo yareeyo tacabka iyo wakhtiga kaga luma bulshada gudashada waajibaadkooda cashuurbixineed, loona sugo badqabka dakhliga dawladda.
5. Sal-balaadhinta cashuuraha;
6. Yaraynta xadiga cashuuraha baaqda;
7. Hirgalinta ganaaxyada cashuuraha iyo dabaqaada xeerarka cashuuraha;

Wax Ka Barro Waajibaadka Iyo Qaab-Dhismeedka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL

1. Hordhac

Waajibaad-ka Wasaaradda

Wasaaradda H.Maaliyada JSL waajibaad-keedu waa mid laga soo minguriyey dastuurka, kaas oo dhigaya dejinta iyo maaraynta miisaaniyad ku haboon illaha dhaqaale ee Dalka. Waxa ay masuul katahay hubinta habsami u socodka nidaamka maaliyadeed ee ay u idmantahay, sida kor-joogtaynta iyo xisaab-celinta kharashaadka Hay'adaha Dawladu galaan. Wasaaradda H.Maaliyadu iyadoo ka duulaysa awaamiirta uu farayo Xeerka Maamulka Maaliyaddu Xeer Lr. 75/2016, waxay isbedelo doora ku wadaa hore-u-dhigida iyo dardar-galinta habsami u socodka masuuliyadda qaran ee ay u xil-saarantahay.


Himilada Wasaaradda

Horumarinta iyo abaabulka dakhli ururinta, jiheynta maamulka maaliyadda iyo dhaqaalahaa guud ee Dalka. Dejinta siyaasado abdo leh (hufan) oo horseeda isla-xisaabtan buuxa, daah-furnaan iyo horumar waara muddada fog.

Hiigsiga Wasaaradda

Wasaarad hanata nidaam maamul maaliyaddeed oo hufan iyo horumar dhaqaale oo waara mudada fog.

1.1 Qaabdhismeedka Wasaaradda H. Maaliyadda



1.2 Tiradda Shaqaalaha Wasaaradda

TIRADA GUUD EE SHAQAALAH WASAARADDAD H. MAALIYADDA								
S.NO	MAGACA WAAXDA	DARAJADA				TOTAL	Jinsi	
		A	B	C	D		Lab	Dhediig
1	Cashuuraha Berriga	367	157	94	121	739	534	205
2	Kastamka	309	131	112	164	716	563	156
3	Xisaa badka	113	14	21	21	169	123	45
4	Maamulka	28	7	11	19	65	33	32
5	Waaxda Iibka	12	0	1	1	14	11	3
6	Waaxda Shaqaalaha	10	1	1	1	13	8	5
7	Waaxda Xidhiidhka Dadwaynaha	9	1	0	0	10	8	2
8	Waaxda Shuruuoda	8	0	0	0	8	4	4
9	Waaxda SLRMIS	36	3	2	1	42	30	12
10	Waaxda PFMKA	5	0	0	5	10	2	8
11	Waaxda Private Sector	10	0	1	1	12	8	4
12	Macro Economic	14	2	1	0	17	12	5
13	Misaniyadda	17	1	0	1	19	14	5
14	Baadhistaa	41	2	0	2	45	40	5
15	Geeriyoodey	11	7	5	11	34	31	4
	TOTAL	990	326	249	348	1913	1421	495
	TOTAL IN PERCENTAGE	52%	17%	13%	18%	100%	74%	26%

1.3 Guud ahaan tirada Xafiisyadda Wasaaraddu ku hawl-gasho

no	Waaxaha	total
1	Kastamka	31
2	C/Berriga	77
3	X/Guud	10
4	Waaxaha Kale	4
	Total	122

2.0 Dakhliga

Warbixinta hawl-qabadka Dakhliga ee Sanadka 2021-ka Wasaaraddu iyada oo fulinaysa Siyaasadda dakhliga, Maamulka Maaliyadda ee ay Wasaaraddu u dajisay kordhinta dakhli soo saarka iyo kobcinta dhaqaalaha, sadexdii sano ee u danbeeyey (2018, 2019, 2020 iyo 2021) waxa la sameeyey korodh dakhli oo dhan 18% (Boqolkiiba sided iyo tobant) ka badan ku talo-galkii Sanad-miisaaniyadeedkii 2017-2019. Waxa dadaal horumar leh laga sameeyey Cashuuraha Berriga gaar ahaan salbalaadhinta cashuuraha sida Cashuuraha Libka (GST-ga), Diiwaangalinta daaraha, Diiwaan-galinta Shaqaalaha iyo Macaash macaashka Ganacsiga iwm.

Dib u habbeynta nidaamka maamulka Cashuuraha iyo Kastamaddu, waxay qeyb weyn ka qaateen fudeydinta cashuur bixinta iyo dhisidda kalsoonidda cashuur bixiyaha, kuwaas oo kordhiyey heerka cashuur bixinta.

Waxaa cashuur-dhaaf loo sameeyay badeecaddo lacagtoodu ku dhawdahay ilaa 30 Milyan oo dollar, si ay dawladdu uga qayb qaadato kobcinta wax soosaarka dalka, kaas oo isna qayb laxaadle ka qaadanaya sicir-bararka ku yimaada aasaarta kala duwan si loo yareeyo.

Sidoo kale waxay wasaaraddu cashuurta raashinka ka dhaafay 20% markii uu bilaabmay xanuunkii safmarenka ahaa ee COVID-19, iyadoo sanadka 2022 siyaasadda miisaaniyadda ay ku jirtay lana hirgaliyay in 10% laga dhaafyo cashuurta raashinka soo degaya, sidoo kalena waxaa cashuurta la kordhiyay ee containers-ka laga dhaafay wixii raashin ah oo dhan.


Iyada oo Wasaaradu ka duulaysa in dakhli soo-saarku yahay laf-dhabarta shaqo ee Wasaaradda iyo guud ahaanba socodsinta hawlmaalmeedka Qaranka JSL, waxay wasaaradu muhiimada u horeysa saaraysaa helista iyo soo-ururinta dakhliga, si awood loogu yeesho daboolista baahiyaha kala duwan ee Qaranka, maadama aynu qaran ahaan ku hawlgalno dakhliga miisaaniyada.

Sidaa darteed waxa ay Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu iyadoo kaashaneysa Mashruuca Dib u habbeynta Maamulka Maaliyadda ee dhinaca Dakhliga (PROFR), Waxa la qabtay hawlahan oo muhiim u ah dakhli soosaarka iyo dabbaqaada sharciga dakhliga:-

2.1 Qaybaha dib u habaynta ee cashuuraha kordhintooda keenay

1	Iibsiga Misaanka gaadiidku fuulaan (Weighbridge)
2	Iibsiga Mishiinadda GST-ga
3	Iibsiga Systemka ITAS-ka
4	Asaasida Gudida ka garnaqa dacwadaha cashuuraha
5	Diiwangalinta Daaraha (Property Registration) (5-gobol)
6	E-Cashier iyo E-payment ee Cashuur ururint iyo kharash bixinta
7	Fududaynta qaadashadda fiisayaasha iyo kaadhka ogolaanshaha shaqo
8	hirgalinta cashuurta GST (Goods and Services Tax)
9	kor u qaadista iyo Casriyaynta Xidhiidhka Cashuurbixiyaha iyo Wasaaradda H/Maaliyadda
10	Kor u qaadka heerka dabbaqaadda iyo fulinta Cashuur bixinta (Compliance)
11	ololaha joojinta Lacagaha aan sharciga wafaqsaneyn (illegal Fee)
12	sal-balaadhinta Systemka Maamulka Kastamadda (CMS)
13	Sumadda Aqoonsiga Cashuur bixiyaha
14	Tax-payer Portal
15	Xaraashka Alaabta muddo dhaafka (Auction)
16	yareynta wakhtiga ka bixida kastamadda

Khariirada Heerka Isdiwaangelinta Cashuuraha ee Ganacsatadda



The graphic features a background of Somaliland 5000 Shilling banknotes. In the foreground, two smartphones are displayed side-by-side. The phone on the left shows the 'ZAAD' service with a list of account types: Xisaabtayda, Lacag la bixid, Dhaq-Dhaqaqa Xisaabtayda, U Wareeji Account kale, Maaraynta Account, and KaBax. The phone on the right shows the 'e-Dahab' service with a list of account types: Xisaabtayda, Lacag la bixid, Bixi Qaansheeg, Maareyn, and KaBax. Both phones feature the official logo of Baanka Somaliland at the bottom.

Hargeisa Tax Payer Registration

BAANKA SOMALILAND 5000
Wasaaradda Maaliyadda Baanka Somaliland

Adeegga

E-SHILLING

ZAAD

BAANKA SOMALILAND

1. Xisaabtayda
2. Lacag la bixid
3. Dhaq-Dhaqaqa Xisaabtayda
4. U Wareeji Account kale
5. Maaraynta Account
10. KaBax

e-Dahab

1. Xisaabtayda
2. Lacag la bixid
3. Bixi Qaansheeg
4. Maareyn
5. KaBax

The screenshot shows the IRD Taxpayer Portal dashboard. At the top, there is a header with the IRD logo, the text "Your TIN: 100010460", and navigation links for "Settings", "Notifications", "Help", and "Sign Out". On the left side, there is a vertical sidebar with icons and labels for "Dashboard", "Registration", "Tax Return", "Taxpayer Education", and "Taxpayer Service". The main content area is divided into four sections: "Registration" (with "Register", "Request Modification", and "De-Register" options), "Return" (with "Employment Income Tax", "Goods and Services Tax", "Rent Income Tax", and "Business Income Tax" options), "Taxpayer Education" (with "Laws and Regulations", "Forms, Tools and Guidelines", and "Training" options), and "Taxpayer Service" (with "Request Tax Clearance", "Tax Calculator", and "Customer Care" options). Each section has a downward-pointing arrow indicating more options are available.

The screenshot shows the IRD Taxpayer Portal login page. It features the IRD logo at the top left, followed by the text "INLAND REVENUE DEPARTMENT" and "TAXPAYER PORTAL". Below this are two input fields: one for "100017431" and another for "Password". There is also a third field with a lock icon and three dots, likely for a secondary password or security code. A large blue "Log in" button is positioned below the password field. At the bottom left, there is a link "Click here to Register now". To the right of the login form is a large, vibrant photograph of a city street at night, showing illuminated buildings and traffic. The entire page has a green header bar at the bottom.

3.0 Horumarinta & Tayeynta Shaqaalaha

Wasaaraddu iyada oo ka faaiidaysanaysa Mashaariicda Dib-u-habeynta Maamulka Maaliyadda ee DRM&PFM iyo PROFR, waxay kor u qaaday Xirfaddaha farsamo ee shaqaalaha Wasaaradda guud ahaan, gaar ahaana hawl-wadeenada dakhli soo saarka.

Waxa muxaadaro diini ah loo qabtay saraakiisha dakhli soo saarka si loo toosiyo Qiyamkooda korna loogu qaado wacyigooda ku aaden Gudashada Amaanada & Dhawrsanaanta Akhlaaqda Shaqada.

Tababaradda la qabtay iyo Shaqaalaha loo qabtay iyo tiradda shaqaaluhu-

No.	Qaybta	Faah-faahin	Tirada Shaqaalaha
1.	Qaybta tababarada Shaqaalaha	. Jaamacaddaha . Tababarada	181 150





4.0 Kharashka

Dib u habeynta Maamulka kharash bixinta dawladda:

Wasaaraddu iyada oo ka duulaysa muhiimadda fudeydinta hanaanka kharash bixinta Dawladda, waxay diyaarisay isla markaan fulisay hagge tilmaamaya shuruudaha kharash galka nooc walba oo kharash miisaniyadeed ah iyo faahfaahinta dokument-yadda ay tahay in lagu soo lifaaqo kharash gal kasta. Qorshahani wuxuu yareeyey weydiimihii badnaa ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud kaga iman jiray laamaha dawladda, waxanu yareeyey wakhtiga kharash bixinta.


Sidoo kale dawladu lacag bixinta dawladda waxay kordhisay qadar dhan 17% marka loo eego kharash bixinta sanadkii 2019. Taasna waxaa keenay qodobadda hoos ku xusan:-

1	Mashruuca daba-galka iyo Qiimeynta Mashaariicda Dawladda (M & E)
2	Mashruuca daah-furnaanta & isla xisaabtanka adeeg bixinta Wasaaradda (Internal Audit)
3	Mashruuca Diiwaan galinta mashaariicda iyo Xisaabaha deeqaha dibadda
4	Mashruuca Diiwaangalinta Hantida Raagta (Asset Registration)
5	Mashruuca fududaynta iyo casriyaynta lacag bixinta dawladda
6	Mashruuca fulinta Shuruucda Maaliyadeed (PFM Act)
7	Mashruuca fulinta sumad xisaabeedka dakhliga iyo kharashaadka (Standard Chart of Accounts)
8	Mashruuca Fulinta xisaab xidhka Dawladda ee IPSAS-ka (International Public Sector Accounting Standards)

4.3 Sawiro dhinaca kharashka

Wasaaraddu iyada oo ka duulaysa muhiimadda fudeydinta hanaanka kharash bixinta Dawladda, waxay diyaarisay isla markaan fulisay Hagge tilmaamaya shuruudaha kharash gal ka nooc walba oo kharash miisaniyadeed ah iyo faahfaahinta dokument-yadda ay tahay in lagu soo lifaaqo kharash gal kasta. Qorshahani wuxuu yareeyey weydiimihii badnaa ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud kaga iman jiray laamaha dawladda, waxanu yareeyey wakhtiga kharash bixinta.

Sidoo kale dawladu lacag bixinta dawladda waxay kordhisay qadar dhan 17% marka loo eego kharash bixinta sanadkii 2019. Taasna waxaa keenay qodobadda hoos ku xusan:-



5.0 Diyaarinta Miisaaniyadd Sanadeedka

Wasaarada H/Maaliyadda waajibaadkeeda shaqo ee ay Qaranka u hayso kuweeda ugu muhiimsan waxaa ka mid ah diyaarinta miisaaniyadda uu ku hawlgalo Qaranku, sida ku cad daastuurka JSL qdobkiisa 55-aad oo ka hadla Miisaaniyada iyo Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer no 75/2016, iyada oo diyaarinta miisaaniyaddu bilaabanto 15-ka bisha May sanadkasta, sida uu dhigayo xeerka maamulka Maaliyaddu.

Hadaba, iyada oo wasaaradu gudanaysa waajibaadkeeda shaqo, waxa ay ugu horeynba la yeelatay kulan muhiiima gudida qaran ee

Miisaaniyadda, kuwaas o loo sharaxay xaalda dhaqaale ee dalku halka ay marayso. Iyada oo la tixraacayo xaashida guud marka dhaqaalaha ee (budget outlook paper), iyo daraasada xaalada dhaqaale ee saddexda sano ee soo socda loona yaqaan (Macro-economic fiscal frame work), si la iskula meel dhigo xadaynta miisaaniyada.

Sidaaookale, iyadaoolaraacayohabraacadiyaarinta miisaaniyada waxa ay wasaaradu joogteysay la tashiga iyo ka qaybgalinta ururada bulshada rayidka ah ee diyaarinta miisaaniyad sanadeedka. Kulankan la tashiga dadweynaha ee diyaarinta

miisaaniyada oo ka mid ah nidaamyada daah furnaanta maamulka maaliyada oo wasaaradu ku talaabsatay saddexdii sano ee ugu danbeeyay, waxa uu soo kordhiyay in bulshada radiydka ay ka qayb gasho talo soo jeedinta meelaha muhiimada ay saarayso miisaaniyadu, iyada oo soo jeedimaha dadwaynaha ee macquulka ah ay si weyn uga dhex muuqato miisaaniyad dawlada, arintaas oo ku dhiirisay ururada bulshada rayidka ah in ay si joogto ah uga soo qaybgalaan kulanka la tashiga dadwaynaha ee diyaarinta miisaaniyadda. Wasaaradu iyada oo tixgalin siinaysa bulshada iyo cashuur bixiyayaashaba waxa ay xoojineysaa fahamka bulshada ee arimaha horumarinta maamulka maaliyadda, si loo helo isla xisaabtan, daahfurnaan, iyo adeeg hufan oo dhanka maamulka Maaliyadda ah.

Ugu danbayn, waxa wasaaaradu gabagabaysay odoroska Miisaniyad sanadeedka 2022-ka, kaas oo diyaar noqday wakhtigii sharcigu dhigayay iyada oo la horgeeyay golaha wasiirada, kuwaas oo waajibkooda ka gutey. Waxaa xusid mudan in odoroska Miisaniyad sandeedka loo gudbiyey golaha wakiilada kuwaas oo su'aalihi ay qabeen ka weydiyay wasiirkha wasaarada horumarinta Maaliyada iyada oo wasiirku dhamaan si waafi ah uu uga jawaabay su'aalihi mudanyaasha golaha wakiilada. Dhanka kale waxaa wax ka badal lagu sameeyay soo jeedimihii ay ku sameeyeen golaha wakiiladu miisaniyad sanadeedkan 2022-ka. Waxyaabha ka qabsoomay diyaarinta miisaaniyada waxa kimada qdobadan:-

Waxaa la go'aamiyey in Wasaaraddu Diyaariso Miisaniyad dhameystiran (Budget comprehensiveness), taas oo sheegayo Qodobka 5aad, Farqadiisa laad, ee Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Qaranka (Xeer Lr. 75/2016) oo sheegaya in wasaaradaha, hay'adaha, komishanada, dawladaha hoose iyo maamulada heer gobol ay u soo gudbiyaan miisaaniyadooda kharash iyo dakhli Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyaga oo ku salaynaya habraaca loo dajiyay diyaarinta miisaaniyadda.

Waxay Wasaaraddu Xoojisay Fulinta Digreetadda Madax weynaha JSL ee Diyaarinta Miisaniyadda dhameystiran oo la helo Sanadka 2021-ka,

Waxa la diyaariyey Miisaniyad faahfaahsan ay

ku jiraan dawladaha hoose, Hay'addaha Madax Bannaan iyo qaar ka mid ah Mashaariicda Horumarka.

Waxaa kulamo lala yeeshay Dawladdaha hoose, Hay'adaha Madax bannaan, Mashaariicda Dibadda ee Horumarineed, Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Hanti-dhawraha Guud, Guiddida baarlamanka ee Dhaqaalaha iyo Miisaaniyadda, kulamadan oo lagaga arinsanayay sidii loo fulin lahaa Diyaarinta Miisaaniyad Dhameystiran 2022-ka.

Waxaa la Diyaariyay Xaashida Guud-Marka ee Miisaaniyadda (Budget Outlook Paper)

Waxaa la Diyaariyay Siyaasadda Dhaqaalaha Guud iyo Maaliyadeed ee Mudadda dhexe 2021-2023-ka.

Waxaa Kulun Wada tashi lala yeelashay Guddi hoosaadka Dhaqaalaha iyo Miisaaniyadda ee Golaha Wakiiladda

Waxa la qabtey Kulun wada tashi oo u dhexeeyay Wasaaradda iyo Ururada aan Dawliga ahayn oo ku saabsan diyaarinta Miisaaniyadda

Waxa kulamo ku saabsan diyaarinta Siyaasadda Miisaaniyadda la galay Guiddida Wasiiradda ee Diyaarinta Siyaasadda Miisaaniyadda

Waxaa la baahiyay oo la daabacay Buuga Miisaniyad sanadeedka 2022-ka ee Dawlada Dhexe, Dawladaha Hoose, & Hay'adaha Madaxa banana

Waxaaa Mareegta Wasaarada lagu baahiyay Miisaniyad sanadeedka 2022-ka, kaas oo ay ka dheehan karaan muwaadiniinta iyo daneyayaasha kaleba

Waxaa la diyaariyay warbixinta dakhliga iyo kharashka ee sanadka 2021-ka

Waxaa la sameeyay qorshahah hawleedka wasaarada Horumarinta Maaliyada ee sanadka 2022-ka ay ku hawlgali doonan waaxaha kala duwan ee wasaaradu

Waxaa tababar ku saabsan hanaanka iyo habraacyada miisaniyada la siiyay, dhamaan isudwayaasha gobolada waaweyn ee Dalka

Warbixinta Waxqabdkii Waaxda Cududda Shaqaalaha Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ee 2021-Kii.

Mahadnaqa Agaasimaha Waaxda

Waaxda Horumarinta Cududa Shaqaalaha ee kaga beeganaa hirgalinta qorshaha iyo hiigisiga Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, waxay ka ciyaartaa door muhiim u ah horumarinta shaqaalaha iyo shaqada Wasaaradda. Waaxdani waxay caawisaa Wasaaradda dhinacyada Qorista shaqaalaha, Tababarka iyo Horumarinta, Qiimaynta Waxqabdkii iyo buuxinta ujeeddooyinkeeda istaraatijiyadeed iyada oo la abuurayo xirfadle iyo shaqaale karti u leh abaabulka; si loo gaadhsiyo adeegyo ka wanaagsan baahiyaha loo adeegayaasha/macaamiisha ama cashuur bixiyeyaasha.

Waaxdanu waxay u xilsaarantahay horumarinta Shaqaalaha ee dhinac walba sida tayaynta xirfadaha ay ku shaqaynayaan, kor u qaadida Waxbarashada Akademic ga ah, sixidda hab dhaqanka iyo la mucaamilka wanaagsan ee dadka loo adeegayo iyo sidoo kale Caafimaadka Shaqaalaha iyo badqabka goobaha shaqada.

Waxaa farxad weyn ii ah inaan halkan idin kula wadaago Waxqabdkii Waaxda Horumarinta Cududa Shaqaalaha ee sanad xisaabeedka 2021.

Haddaba si Waaxdu uga midho dhaliso hiigsigeeda iyada oo ka shidaal qaadanaysa tilmaamaha iyo tusaalooyinka Madaxda sare ee Wasaaradda iskaashi buuxana la leh dhamaan Waaxaha kale ee Wasaaradda waxay sannnad walba diyaarisaa qorshe hawleed laga soo dheegtay Strategy planka 5 ta sanno ee Wasaaradda.

Waxaan si gaar ah ugu Mahad celinayaan dhamaan Madaxda Wasaaradda oo uu u horeeyo Wasiirka, Wasiir Xigeenka, Agaasimaha Guud, iyo dhamaan Agaasime Waaxeedyaduba. Ugu danbeyn, waxaan fursaddan aan uga faa'iidaysanayaan inaan ku cabbiro sida aan ugu diirsaday dedaalka aan daalka lahayn ee hawladeenada Waaxda Horumarinta Shaqaaluhu u guteen waajibaadkoodii shaqo ee



waaxda. Wuxaan kale u mahadnaqayaa Lataliyaha Waaxda Mr Cabdiraxmaan Yuusuf, dedaalka, kartida iyo hal-abuurka uu waaxda ku soo kordhiyey. Dhamaan waxaan ku dhiirigelinayaan inay halkaa ka sii wadaan geediga.

Maxamed Axmed Wayrax

Agaasime, Waaxda Horumarinta Cududa Shaqaalaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL

HORDHAC

Warbixintani waxawaxaa ayqeexaysaahawlqabadka Qorshaha Shaqo ee Waaxda Horumarinta Cududa Shaqaalaha ee sanad maaliyadeedka 2021. Waxaan kusoo koobi doonaa hawlilihii shaqo ee qabsoomey sanadkaa tagey, si la fahmi karo una noqota tusaale nool dhanka waxqabadka sanadkan 2022.

Waaxdan Horumarinta Cududa Shaqaalahu waxaa ka hawlgala shaqaale tiradoodu dhan tahay 13 qof. Dhanka kale waxaa loo kala saaraa waaxdan 7 qaybood, sida hoos ku cad:

1. Agaasimaha Waaxda
2. Agaasime ku-xigeenka Waaxda
3. Madaxa Qaybta Shaqaalaysiinta
4. Madaxa Qaybta Kaydinta Xogta
5. Maxada Qaybta Tababarada
6. Madaxa Qaybta Anshaxa iyo Abaal marinta
7. Madaxa Qaybta Caafimaadka iyo Badqabka
8. Maxada Qaybta Qorshaynta iyo
M u s h a h a r o o y i n k a
9. Madaxa Qaybta Koormeerka iyo dabagalka
10. Xoghayaha Waaxda

Wasaaraddu, si la mid ah dhammaan wasaaradaha kale ee dalka waxay ku shaqeeyaan qaab-dhismeed sharci oo adag. Tiro ka mid ah sharuuc sharciyeed iyo siyaasado taageeraya ayaa si toos ah u khuseeya maareynta cududa shaqaalaha, kuwaas oo ah hagayaasha dhanka wanaajinta iyo kobcinta shaqaalaha, waxaa ka mid ah:

1. Sharciga Shaqaalaha Dawladda
2. Hagayaasha iyo siyaasadaha maamul ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda
3. Sharciga shaqaalaha rayidka

HIIGSI

In la dhiirrigeliyo lana abuuro shaqaale karti iyo aqoon leh, iyadoo kor loo qaadayo magacaabiista ku salaysan mudnaanta iyo qiimaynta waxqabadka.

HIIGSI

Si loo muujiyo balanqaad heer sare ah oo dhinacyada qorista, xulashada, dhiirigelinta, shaqo helista fursadaha siman iyo tababarka si loo soo jiito loona haysto shaqaale tayo sare leh oo karti leh.

QIYAMKA AASAASIGA AH

Waaxda Horumarinta Cududa Shaqaaluhu waxaa haga qiyamkan aasaasiga ah ee soo socda

- Hoggaaminta Suuban: Wuxaan ku hoggaaminaa tusaale waxaana u doodnaa in si siman loola dhaqmo hab-dhaqankeena, siyaasadaha, iyo dhaqamadayada
 - Dabaaldega wada shaqeynta: waxaan dhiirigelinaa kala duwanaanshaha fikradaha, waayo-aragnimada iyo asalka, waxaan u dabaaldegnaa ka qaybgalka iyo iskaashiga dhamaan dadaaladayada.
- Dhiirri-gelin wada xidhiidh: Wuxaan ka codsanaa talada kuwa kale waxaana ku dadaalnaa daahfurnaan iyo ka mid noqosho.
 - Soo saaris Natijjooyin Tayo leh: Wuxaan aaminsanahay in kuwa aan u adeegno ay mudan yihiin adeeg aad u wanaagsan maadaama, jawiga shaqadu uu hagaajiyo natijjooyinka tayada.
 - Horumarinta iyo badqabka Shaqaalah
 - Hufnaanta iyo cadaalada dhammaan mabaadi'da iyo dhaqamada maamulka iyo horumarinta cududa shaqaalah.

WAXQABADKII WAAXDA EE SANADKA 2021

Waaxdu iyadoo gudaneysa waajibaadkeeda ay u xilasaaran tahay, kana duuleysa istaraatiijiyadda wasaaradda, waxaa u qabsoomey dhamaan hawlqabadkii iyo yoolalkii u tirsanaa sanadka 2021. Sannadkan dhamaaday ee 2021 Waaxdu waxay diyaarisay qorshe-hawleed ka kooban 11 ujeedo/hadaf (Objective) oo ay ka farcameen 39 Hawlqabad (Activity) oo dhammaantood ku fulay 100% marka la ga reebo Database system-ka oo 75% ku xidhmay, sababtuna tahay shaqaale badan oo sannadkii 2021 soo kordhay iyo casriyaynta hawshaas oo aanu meel hoose ka soo bilownay.

Qorashaha Waaxda waxaanu u daadajinay dhamaan madax qaybeedyada oo aanu ku siinay buugaag u gaar ah kana saxeexnay mid walba inta ka khusaysa, waxaan aad ugu faraxsanay in madax qaybeedyada mid waliba wixii laga filayay iyo dheeraad gaadhad sida ku cad lifaaqayada hoos ku cad oo dhamaantood iskood isu fasiraya:

No.	Qaybta	Faah-faahin	Tirada Shaqaalah a	Lifaaqa
1.	Qaybta tababarada Shaqaalaha	<ul style="list-style-type: none"> • Jaamacadaha • Tababarada 	181 104	Lifaaq No.1
2.	Qaybta Mushaharooyinka Shaqaalaha	<ul style="list-style-type: none"> • Dhaq-dhaqaaqa mushaharka 	300	Lifaaq No.2
3.	Qaybta Kaydka iyo Xogta Shaqaalaha	<ul style="list-style-type: none"> • Shaqaalaha Darajada A • Shaqaalaha Darajada B • Shaqaalaha Darajada C • Shaqaalaha Darajada D <p style="text-align: center;">Total</p>	990 324 249 348 1911	Lifaaq No.3
4.	Qaybta Caafimaadka Shaqaalaha	Kaalmada Caafimaad (1,134,932,000 SL SH)	101	Lifaaq No.4
5.	Qaybta Koormeerka iyo Dabagalka	<ul style="list-style-type: none"> • Shaqaalaha habsanka October • Shaqaalaha habsanka November • Shaqaalaha habsanka December • Madax-taabashada shaqaalaha (way socotaa ilaa hada 692 hargaysa ah ayaanu dhamaystirnay) <p style="text-align: center;">Total</p>	53 52 47 152	Lifaaq No.5
6.	Qaybta Shaqaalaysiinta	<ul style="list-style-type: none"> • Shaqaalaysiin • Shaqo Qaran 	179 95	Lifaaq No. 6

		<ul style="list-style-type: none"> Buuxin Jago-Banaan Wareejinta Wasaarado kale <p style="text-align: right;">Total</p>	21 06 301	
7.	Qaybta Anshaxaa iyo Abaalmarinta	<ul style="list-style-type: none"> Shaqaalaha La dalacsiiyay Shaqaalaha Qaatay Fasaxyada Shaqaalaha la anshax-mariyay Abaal-marinta Sanadka (hada la wadaa) <p style="text-align: right;">Total</p>	35 53 158 ? 246	Lifaaq No. 7

Shaqaalaha Wasaaradda si loo fahamsiyo waxa laga doonayo, waajibaadka saaran iyo xuquuqdooda, waxaa la daabacay Buugaagta hoos ku qoran:

1. Buuga shaqo-qeexista Shaqaalaha Wasaaradda oo dhan
2. Xeer hoosaadka Anshaxaa Shaqaalaha
3. Buug yaraha Siyaasada iyo Hagaha Shaqaalaha
4. Buug yaraha Maaraynta Maamulka Shaqada
5. Buuga Qorshe-hawleedka Waaxda u gaarka ah
6. Buuga Guulaystayaasha abaalmarinta sanadkii 2020 (June 2021)

Dhamaan buugaagtaasi nuxurka ay xambaarsanyihiin shaqaalaha waa la gaadhsiiyay waana lagu tababaray.

Waaxdu waxay ku guulaysatay:

- In shaqaalaha mutaystay abaalmarinta 2020 la abaalmariyo June 2021.
- In la hagaajiyo habacsanaanta iyo habsanka shaqaalaha lana dhaqan gelyay wareegtadii Wasiirk Xeer No.1.
- In la soo wada gudbiyay liisaskii qiimaynta shaqaalaha ee gobolada waxaana socda abaabulka abaalmarinta shaqaalaha mutaystay 2021kii.

Ugu danbayn sannadkan cusub Waaxdu waxay ku talo jirtaa dhammaystirka qabyada ku jirta systemka Data-da Shaqaalaha.

La soco.....

Xogsidaha Cashuurta iyo Cashuur-bixiyaha.

Fariinta Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyada

Ugu horrayn waxa mahad oo dhan iska leh ALLAH ina- siiyay dhammaan nimcooyinka kala duwan ee aynu haysano oo aan tiro lagu koobi karin, innoona suurta galiyay in aynu dhammaysytirno “Buugga Xogsidaha Cashuuraha-Berriga” ee {Cashuurta iyo Cashuur-Bixiyaha}.

Marka labaad waxaan aad ugu faraxsanahay in uu dhammaystirmey buugga tacriifadaha cashuuraha berriga oo koobsanaya dhammaan tacriifadaha kala duwan ee ay ku hawl galaan xafisiyada cashuuraha berrigu, buuggani waxa uu si nidaamsan oo hufan utusayaa shaqaalaha cashuuraha berriga ee u idman dakhli ururintu inay ka helaan xogta iyo tilmaanta ay ubaahdaan ee ku saabsan cashuuraha kala duwan ee ay ka soo ururiyaan cashuur bixiyayaasha ay ku waajibtay cashuurtu.

Hadda ba ujeedada ugu weyn ee buugga xogsidaha cashuur bixiyahu uu xambaarsanyay waxa ay tahay “in ay helaan cashuur bixiyayaashu xog si ay u ogaadaan ama u hubiyaan xaddiga ama nooca cashuureed ee ku waajibtay.”

Sidaa darteed waxa hada kadib u fududaan doonta cashuur bixiyaha inuu fahmo nooc kasta oo cashuureed oo looga baahan yahay iyo xadigeedaba oo si waafi ah uga muuqata buugga xogsidaha cashuur bixiyaha.

Ugu danbayn, buuggani waxa uu faa’ido weyn u leeyahay nidaamka iyo hufnaanta adeega dakhli ururinta ee waaxda cashuuraha berrigu ugu xilsaarantay Wasaaradda H/Maaliyadda iyada oo u qayb weyn ka tari doono in cashuur bixiyaha aanay wakhti badan ka qaadan hubinta iyo helida



nooca ama xaddiga cashuureed ee ay bixinayaan. Sidoo kale waxa uu guud ahaan cashuur bixiyaha ka caawinayaan barashada ilaha kala duwan ee uu kaga waajibi karo dakhli ama cashuur.

*Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda
Dr. Sacad Cali Shire*

Ujeedada Xogsidaha (Cashuurta & Cashuur-Bixiyaha)

Ujeedada dhiganahani waxa ay daaran tahay, sidii guud ahaan bulshada gaar ahaana cashuur-bixiyaha fahan ama xog looga siin lahaa cashuuraha, hadii ay tahay tacriifaddaha sharcigu sargooyey, inta jaad/qaybood ee ay ka koobanyihiin cashuuruhu, qeexitaanka mid kasta, xiliyada ay waajibto, cida ay ku waajibto, ganaaxyada iyo arimaha kale ee ka dhalan kara marka xiligeeda lagu bixin waayo, xeerarka cashuuraha, istiraatijiyyadda cashuuraha Somaliland, hanaanka ka-gar-naqa dacwaddaha ka dhasha cashuuraha, xidhiidhada xafiisyada cashuuraha-berriga iyo arimo kale oo door ah oo la hal-maala cashuuraha gaar ahaana cashuuraha-gudaha (Berriga).

Sida aad ka dheehan doontid marka aad gudaha u sii gasho buugan, waxa si gaar ah diirada loogu saaray cashuuraha tooska ah marka laga tago cashuurta iibka ee adeegyada iyo alaaboo yinka oo iyadu ah cashuur dadban. Sidaa darteed xogsidahan qayb kama aha cashuuraha dadban ee lagu qaado kastamada.

Xogsidahani waxa uu guud ahaan koobsan doonaa arimahan:

Dhawr bog oo horu-dhac u ah dhiganaha sida; fariinta wasiirka wasaaradda, ujeedada xogsidaha, hiigsiga istaraatijiyyadeed ee siyaasadda cashuuraha jamhuuriyadda Somaliland.

20 cutub oo si guud mar ah uga war-bixin doona cashuuraha-gudaha jaadadkooda, qeexitaanka cashuur, adeegyada ay ku dabarto dawladdu dakhliga, is-barbardhiga xadiga cashuuraha somaliland iyo wadamada aynu jaarka nahay, tacriifaddaha xeerku sargooyey, cida ay ku waajibtay, xiliyada ay waajibayso mid kastaa, ganaaxyada ka dhalan kara marka lagu bixin waayo wakhtiga loo xadiday.

Xidhiidhada xafiisyada cashuuraha-berriga ee gobolada iyo degmooyinka dalka, hanaanka ka-gar-naqa dacwaddaha ka dhasha cashuuraha iyo kala saraynta xeerarka & mudnaanta dabbaqaadooda

Tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha (Tin)

Tirsiga aqoonsiga cashuurbixiyaha waa tixraac namber(TIN) oo ay bixiso waaxda cashuuraha berrigu taas oo looga jeedo in lagu aqoonsado cashuur bixiyayaasha isla markaana cashuur bixiye kasta loo asteyn doono mid u gaar ah.

Tirsiga aqoonsigu waxa uu ku waajibay shaqsi kasta ama shirkad kasta oo ay ku waajibtay cashuur bixin iyo soo gudbin xisaabcelin, sidaa daradeed cashuurbixiyaasha leh laamo ganacsiyeed oo ku kala yaala meelo kala duwan waa inay lahaadan d hal TIN oo kaliya.

1.1 Nidaamka Isdiiwaangelinta

Waaxda cashuuraha berrigu waxay cashuurbisiyaasha u diyaarisay laba qaab oo ay isku diiwangelin karaan si ay u helaan Tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha(TIN)

Habka manualka ah

Cashuurbixiyahu waxa ay si toos ah ugu tagayaan xafisiyadda cashuuraha berriga kaas oo uu ka helay adeega diiwaangelinta iyo bixinta tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha(TIN)

Habka electronic-ga ah

Cashuurbixiyahu waxa ay si toosa u booqan karaa mareegta casriga (online-taxpayer registration portal) waaxda cashuuraha berriga taas oo uu si fogaan arag ah uu isku diiwangelin karo sidaana ku heli karo tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha(TIN) .

1.2 TIN-Ka iyo Cashuuraha waajibay

Cashuurbixiyahu marka uu buuxbuuxinayo foomka diiwaangelinta waxa uu dooranaya cashuuraha ku waajibay ee uu u isticmaalayo TIN-Kiisa si isxilqaan ah kuwaas oo kala ah

- Cashuurta shaqaalah (Employment income tax)
- Cashuurta Ganacsiga shirkadaha (Corporate income tax)
- Cashuurta ganacsiga shaksiyadka(Individual income tax)
- Cashuurta xakameynta (Excise tax)
- Cashuurta kiradda daaraha Cashuurta madaganayaasha Withholding tax
- Cashuurta Ilbka adeega iyo badeecadaha (Goods and service tax)
- Cashuurta kiradda daaraha (Rental income tax)

1.3 Istimmaalid La'aanta Namabarka Tix-Raaca Cashuureed

Qofka isagoo og ama taxadir daro u isticmaala number tixraac cashuureed oo been ah, oo Ay ka mid tahay lambar aqoonsi cashuur bixiye kale lagu xisaab celiyay ama dukumenti ku qoran ama loo isticmaalo ujeedooyinka xeerkan, wuxuu galayaa dambi wuxuuna mudanayaa xukun ganaax oo aan ka yarayn 20(currency point) ama xadhig mudadiisu aanu ka badnayn hal sano ama labloodoba.

NB.wixii macluumadda dheerada ee aad u baahato la xidhiidha Xafiiska Xarunta Isdiiwaangelinta Cashuur-bixiyaha oo kuyaala Xarunta Dhexe ee Waaxda Cashuuraha Berriga TEL 4104241

2 Soo Xareynta Xisaab-Celinta Cashuuraha

Cashuur-bixiye kasta oo leh sumadda aqoonsiga TIN cashuureed waxaa looga baahan yahay inuu soo xareeyo xisaab-celinta mid kasta oo ka mid ah waajibaadka cashuureed ee ugu diiwaan gashan TIN-numberkiisa, hadaba cashuurbixiyashu si iskood ah ayay u soo diyaarinayaan xisaab-celinta cashuuraha ku waajibay, kuwaas oo ku soo gudbin doona foomamka xisaabcelinta ee ay u diyaarisay waaxda cashuuraha berrigu.

Cashuur-bixiye kasta oo leh sumadda aqoonsiga TIN-ka isla markaasna aan kasban wax dakhli ah ama helin dhaqdhaqaaq ganacsi mudadaas waxa looga baahanyahay inuu soo xareeyo xisaabcelintiisa oo muujinaysa xaaladiisa madhan(Nil)

Shaxda hoose waxa ay ku tusaysaa waqtiyada sharciga ah ee soo xareynta xisaabcelinadda iyo Ganaaxyadda ka dhasha soo gudbin la,aanta iyo daahitaanka

No	Nooca Cashuuraha	Ugu danbeyn	Ganaaxyadda
1	Cashuurta shaqaalaha	15-ka bisha bisha xigta	2% Ganaax
2	Cashuurta M/M/ Ganacsiga	30-ka bisha April.	2% Ganaax
3	Cashuurta kiradda daaraha	30-ka bisha April.	2% Ganaax
4	Cashuurta libka(GST)	21-ka bilkasta	2% Ganaax
5	Cashuurta Madeganayaasha Withholding Tax	15-ka bisha bisha xigta	2% Ganaax

NB.wixii macluumadda dheerada ee aad u baahato la xidhiidha Xafiiska Xarunta xisaabcelinta cashuur-bixiyaha oo kuyaala Xarunta Dhexe ee Waaxda Cashuuraha Berriga TEL 4008577

3 Macluumadka Cashuuraha Waa Weyn

3.1 Cashuurta Shaqaalaha

3.1.1 Maxay tahay cashuurta shaqaaluhu?

Cashuurta shaqaalahu waxay ku waajibtay dakhli kasta oo shaqaale ka soo gala shaqo sida uu sheegay qdobka 70aad ee Xeerka dakhliga cashuuraha berrigu waxaana ka mid ah qadarada soo socda:-

- Xuquuq Maalmeed, Mushahar, lacagta fasaxa loo qaato, fasaxa la lacageeyo, lacagta wakhtiga shaqada ee dheeraadka ah, ajuurooyin, lacagta faa'iido wadaaga ah, xuquuq shaqo ka tegis, abaal marin, jid-mar, madadaalo,
- Qiimaha dheef kasta oo la hibeeyay
- Qadar kasta ama magdhaw uu bixiyo loo shaqeeye,
- Qadar kasta oo lagu helo xuquuq heshiis shaqo oo wakhtigiisii dhammaaday ha lagu muujiyo ama yaan lagu muujinin heshiishka xuquuqda noocaas ah ama lagu heli karo oo ah qadar u dhigma heshiska shaqo.

3.1.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta shaqaalahu?

Tacriifadda Cashuurta shaqaalahu waa boqolkii ba lix (6%).

3.1.3 Side loo bixiyaa cashuurta shaqaalaha?

Loo shaqeeyaha ayaa bil walba ka reebaya shaqaalahiisa Cashuurta shaqaalaha isla markaasna isagaana bilkasta ku bixinaya xafiska cashuuraha berriga ee ugu dhow.

3.1.4 Haddii aan la daaho maxaa dhacaya?

Haddii aad la habsaanto cashuurta shaqaalaha waxaa dhacaya ganaax 2%

3.2 Cashuurta Macaashka Ganacsiga

3.2.1 Waa maxay cashuurta macaashka ganacsigu?

Cashuurta macaashka ganacsiga waxa laga qaada faaidada dakhli kasta oo qof ka soo gala hawlgalo ganacsi

3.2.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta macaashka ganacsigu?

Tacriifadda Cashuurta macaashka ganacsigu waa boqolkii tobant (10%) ku dhacaysa faaiida ganacsiga

3.2.3 Side loo bixiyaa cashuurta macaashka ganacsiga?

Waxaa lagaga baahan yahay Xisaab-xidhka Cashuurta macaashka ganacsi-ga oo ah sannad le ugu danbayn bisha afraad ee sannadka cusub, Cashuur bixiyahu waxa keenaya xisaabcelintiisa Cashuurta macaashka ganacsi-ga waxaa lagu bixiyaa: sannad dakhliyeedkasta, oo macnaheedu yahay 12 bilood oo ay ugu danbyso 31 December.

3.2.4 Maxaa dhacayahadii aan la daaho?

Haddii aad la habsaanto cashuurta Macaashka ganacsiga waxaa dhacaya ganaax 2%

La soco.....



+5%

MISHIINKA CASHUURTA IIBKA

Si Loo Helo Xisaab Cashuureed Oo
Sugar, Fadlan gacan nagu sii
Adeegsiga Mishiinka Cashuurta libka

INFO@SLMOF.ORG

WWW.SLMOF.ORG



ODOROSKA MIISAANIYADDA DAWLADDA-DHEXE 2022

SLSH 2,410 BILYAN

OO KA BADAN 11% MIISANIYADII 2021, TII OO CASHUURAHA
QUUTAL DARUURIGA HOOS LOO DHIGAY 10 %

WAXAA SARE LOO QAADAY QOONDADA



MUSHAHARKA
CIIDAMADA



HORUMARINTA
MASHAARIICDA
IYO ADEEGA BIYABA



HORUMARINTA
ADEEGAYADA
CAAFIMAADKA



DEDAALADA
AQOONSI RAADINTA
IYO ARIMAHADIBADA



WAXSOOSAARKA

20% ↑

94% ↑

32% ↑

20% ↑

12.5% ↑